

AL-MANAR PRIMARY AND SECONDARY SCHOOL

MAADADA:TAARIKH (Teacher Ali mo'alin Said) Fasalka F4A

Cutubka 5aad: Kacdoonno iyo Dagaallo waa weyn [Diyaariye M M C]

Weydiimo iyo warcelin

(1 S) Sheeg sanadka ruushka uu dagaal lagalay dhigiisa jabbaan?

(1 J): Wuxuu lagalay muddadii u dhexaysay 1904—1905tii

(2 S): Sheeg ruushka ujeedada uu dagaal ula galay jabbaan?

(2 J): Qabsashada dhulal cusub ee bariga fog

(3 S): Sheeg waxyaabaha dhaliyay kacaanka ruushka?

(3 J): Waxyaabaha dhaliyay kacaanka ruushka waxaa ka mid ah :-

- Xukunka oo keligii talis ahaa
- Guuldaradii ka soo gaartay jabbaan
- Hoos u dhaca dalaga beeraha
- Shaqo joojinta shaqaalaha
- Mowjado mudaaharaadyo iyo xasilooni daro
- Xisbiyadda mucaaradka
- Xisbiga shaqaalaha hantiwadaaga dimoqoraadiga

(4 S): Kuma ayaa noqday hogaamiyaha kacaanka ee dowladda ruushka ?

(4 J): Waxaa noqday faladamiir linin

(5 S): Maxay ku guulaysteen shaqaalaha ka dib dhalashadii kacaanka?

5 J: Waxay ku guulaysteen in ay xakameeyaan warshadaha iyo goobaha wax soo saarka

6 S: Waxaad sheegtaa wareegtada uu soo saaray madaxweyne faladamiir linin?

6 J: –in uu mamnuucayo dhaqdhaqaaqa hawlaha xisbiyada siyaasadeed.

–in uu baabi'inayo hantida gaarka loo leeyahay ee ruushka.

–in uu sameynayo bangi qaran oo cusub, ka dib markii uu qaramaayay dhamaan bangiyada gaarka loo leeyahay.

7 S: Muxuu ahaa dagaalkii labaad ee adduunka?

7 J: Waxa uu ahaa natiijo ka dhalatay qalalaasihii ka dhashay dagaalkii 1aa ee adduunka

8 S: Waxaad sheegtaa sababihii ugu muhiimsanaa dagaalkii 2aad ee adduunka ?

8 J: Sababihii ugu muhiimsanaa dagaalkii 2aad ee adduunka waxaa ka mid ah :–

- Heshiiskii fersaylis ee la gaaray dhmaadkii dagaalkii 1aad ee adduunka
- Is-ballaarinta jabbaan
- Fashistaha
- Hitler iyo xisbiga naaziga
- Dhaqaale xumadii weyneyd

(9 S: Goormee ayuu hitler noqday keli-taliyihii jarmalka?

(9 J): Wuxuu noqday sanadkii 1934tii

(10 S): Goormee ayuu hitler qabsaday Austriya?

(10 J): Wuxuu qabsaday bishii maarso sanadkii 1938dii

(11 S): Sheeg bilowga dhacdooyinka dagaalka 2aad ee adduunka?

(11 J): –Bishii sibtember 1939kii,ciidamada jarmalka ayaa ka tallaabay soohdinta booland, taas oo hurisay dagaalkii 2aad ee adduunka.

–Jarmalka oo awooday in ay galaan Denmark ,Norway, Hooland,biljam ,faransiiska iyo dalalka balkaniska

–Guuldarii jarmalka kasoo gaartay ingariiska

(12 S): Goormee ayuu ruushka ka tallaabsaday soohdinta jarmalka markii ugu horraysay?

12 J): Bishii desimber 1944tii

13 S): sheeg dowladda ku wehlisay ruushka soohdinta jarmalka ?

13 J): Dowladda maraykanka

14 : Sidee ayaa loo dilay keli-taliyihii talayaaniga ee musaliini?

14 J: Waxaa laga soo laa laadiyay mid ka mid ah tiirarka nalalka ee magaalada milan

15 S): Goormee ayuu is dilay keli-taliyihii jarmalka ee Hitler?

15 J): Wuxuu is dilay bishii abriil 1945tii

16 S: Goormee ayaa lagu dhawaaqay aas aaskii israa'iil ?

16 J): Waxaa lagu dhawaaqay may 15, 1948dii

17 S): Maxaa loo yaqiinay labada dhinac ee dagaalkii 1948dii

17 S): dhinaca carabta waxaa loo yaqiinay dagaalkii falastiin ,ama "Musiibadii",halka israa'iil ugu magac dartay "Dagaalkii xornimada.

18 S): Maxaa loo yaqiinay dagaalkii 1956dii si caalami ahaan?

18 J): "Duullaankii saddex geesoodka ahaa"

19 S): Kuma ayuu ahaa madaxweynaha masar?

19 J): Wuxuu ahaa Jamaal cabdinaasir

20 S): Maxaa loo yaqiinay labada dhinac ee dagaalkii 1967dii?

20 J): Waxaa carabta looga yaqaanaa magaca ah Dib-u-Dhac halka israa'iil iyo qoraallada dawliga ahi ay ugu yeeraan "Dagaalkii Lixda Maalmood"

21 S): Maxaa loo yaqiinay labada dhinac ee dagaalkii 1973dii?

21 J): Dhinaca carabta waxaa looga yaqiinay 6da Oktoobar ama 10ka Ramadaan halka israa'iil ugu magac dartay "Dagaalka ciiddii dembi dhaafka"

22 S): Goormee ayuu talyaanigu ku soo duulay oo qabsaday itoobiya?

22 J): Sanadkii 1935tii

23 S): Maxay ahayd ujeedada midowga soofiyeeti?

23 J): In uu qabsado bariga yurub

24 S): Waxaad sheegtaa madaxweynaha midowga soofiyeeti?

24 J): Waxa uu ahaa Josef istaalin

25 S): Maxaa loogu magacdaray isballaarinta midowga soofiyeeti?

25 J): Waxaa loogu magacdaray kaalmada reer yurub

26 S): Goormee la aas aasay ururka xafiiska warfaafinata shuuciyadda?

26 J): Waxaa la aas aasay sanadkii 1947dii

27 S): Qeex eray dagaalkii qaboobaa.

27 J): Dagaalkii qaboobaa waxa uu ahaa isku dhac aan toos ahayn oo dhex maray labadii quuwadood ee ugu weynaa adduunka mareykanka iyo midowga soofiyeeti

(28 S): Waxaad sheegtaa dowladdaha hogaaminaayey dalalka reer galbeedka?

(28 J): Maraykanka , Faransiiska iyo ingariiska

(29 S): Waxaad sheegtaa dadka ugu muhiimsanaa ee ka qeyb qaatay kacaanka.

(29 J): Dadkii ugu muhiimsanaa ee ka qeyb qaatay kacaanka waa:

✖ Faladamiir linin

✖ Torotiksi

(30 S): Sheeg saameynta kacaankii ruushka ku yeeshay adduunka?

(30 J): Saameynta kacaankii ruushka ku yeeshay adduunka waxaa ka mid ahaa dhibaayooyin dhaqaale

(31 S): Waxaad sheegtaa suldaankii uu dhintay hogaamiyihii soofiyeetigii Josef istaalin?

(31 J): Waxa uu dhintay sanadkii 1953dii

(32 S): Sheeg goormee ayuu bilawday dagaalkii 1aad ee adduunka?

(32 J): Wuxuu bilawday sanadkii 1914tii

(33 S): Sheeg goormee ayuu dhamaaday dagaalkii 1aad ee adduunka?

(33 J): Wuxuu dhamaaday sanadkii 1918dii

(34 S): Sheeg goormee ayuu bilawday dagaalkii 2aad ee adduunka?

(34 J): waxa uu bilawday sanadkii 1939kii

(35 S): Sheeg goormee ayuu dhamaaday dagaalkii 2aad ee dunida?

(35 J): Waxa uu dhamaaday sanadkii 1945tii

(36 S): Sheeg goobaha uu ku dhex maray iska horimaadka aan tooska ahayn labada quwadood ee ugu weynaa adduunka.

36 J: Waxaa ku dhex maray goobaha kala ah:

✖ Jarmalka

✖ Bariga dhexe

- ❑ Fiyatnaam
- ❑ Afganistaan
- ❑ Kuuba
- ❑ Kuuriya iyo meelo kale

(37 S): Sheeg xaaladda siyaasadeed ee adduunka ka hor dagaalkii 2aad.

(37 J): Xaaladda siyaasadeed ee adduunka ka hor dagaalkii 2aad Waxa uu ahaa mid aan xasiloonaayn oo ku saleysnaa laba awoodood

(38 S): Sheeg xilligii uu bilawday dagaalkii qaboobaa?

(38 J): waxa uu bilawday ka dib dagaalkii 2aad ee dunida

(39 S): Sheeg sida uu mareykanka kusoo galay dagaalkii 2aad ee adduunka?

(39 J): Jabbaanku waxa ay weerareen maraakiibta mareykanka ee joogay dekada biiral ee badweynta deggan, waxa ayna dejiyeen wax badan oo ka mid ah maraakiibtaas, taasina waxay keentay inuu dagaalka ku biiro mareykanka.

(40 S): Sheeg dhacdooyinka taariikhiga ah ee ugu muhiimsanaa ee dhacay xilligii dagaalkii qaboobaa?

(40 J): Dhacdooyinka ugu muhiimsanaa ee xilligii dagaalkii qaboobaa waxa uu ahaa xiriirkii labada isbahaysi ee dunida.

(41 S): Xaddid xalaadda yurub intii lagu jiray dagaalkii qaboobaa?

(41 J): Yurub waxa ay isu aragtay in ay u kala qeybsan tahay laba isbahaysi oo waaweyn oo uu u dhexeeya isku dhac siyaasadeed oo caalami ah oo loo yaqiin "Dagaalkii qaboobaa "

DHAMAAD

**ALLAH AYAA MAHAD U SUGNAATAY
OO II SUURTA GALIYAY IN AAN SOO GABAGABEEYO DIYAARINTII.
WEYDIIMAH A IYO WARCELINTOODA**

WAA DIYAARINTII : Mahad Muhummed Omar = [M M C]

Wixii faafaahin ah laxariir: 0619518933

